



UJEEDO: CADEYN QAADASHO QAYB DHAXLAYD.

Maanta oo ay taariikhdu tahay 24/08/2024, Anigoo ah Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo", Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Galbeedna Ka Xiga Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa ii Timid Canab Cali Xuseen ina Waydiisatay in aan u Qoro Cadeyn Qaadasho Qayb Dhaxaleed Waxayna Xafiiska Nootaayaha Horteeda Ka Cadeysay Sidatan:-

1- Aniga oo ah CANAB CALI XUSEEN, Somali ah Hooyadeedna layiraahdo Qaali Xuseen Guraadse Ku Dhalatay B/wayne 1973 Lehna Somali Pass.l.r.P01539685, Waxaan Qoraalkaan Ku Cadeynayaa aniga oo xis qaba Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Qaatay Qismigii Dhaxaleedka ee aan Ku lahaa Dhaxalka Walalkay Marxuum Maxamed Cali Xuseen iyo Dhaxalka Hooyadeey Marxuumad Qaali Xuseen Guraadse, Hantidaas oo ah Dhulka uu Ku Qoran yahay Walaalkey Marxuum Maxamed Cali Xuseen, Dhulkaas oo Ku yaal: Muqdisho, Degmada: (Yaaqshiid) Cabirkiisuna Dhan yahay (30X40)-M, Looto No: 500-502-503-505-A, Lehna W.M.L:(5258/89), Tr. 25/11/1989, Kana Soo Baxday Maxkamada Degmada H/wadaag ee Xamar, Garsooraha: C/qaadir Sh.Xasan Cadde, Kaaliye: Maryan Maxamed Diiriye, Waxaana Qismigaygii igu Soo Aaday uu Noqday Lacag Dhan US\$ 16,281.8 (Lix iyo Todoban Kun iyo Labo Boqol Sideedan iyo Kow Dollar Dhibic Sideed Sinti) Waxaana Lacagtaas aan u Qaatay Boos Ku Yaal Muqdisho Degmada Kaaran "Hiliwaa" Oo lagu Soo Qiimeyay Lacagta Sare.

Waxaan kaloo caddeynayaa laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay mida Sare ku xusan in aan qaatay qaybtaydii dhaxaleed aan Ku Laha Walalkay Marxuum Maxamed Cali Xuseen iyo Dhaxalka Hooyadeey Marxuumad Qaali Xuseen Guraadse, ee Dhulka Sare Ku Xusan, isla markaana aysan jirin wax danbe oo aan ku leeyahay Dhulkaan.

2-Anaga Oo kal ah Axmed Cabdi Axmed "Baryare" & Sakariye Maxamed Nuur Waxaan Cadeyneena in aan Markhaatiyaal ka nahay Cadeyntaan Qaadashada Qayb Dhaxleedka ah Ee Sare Ku Xusan.

EEG BOGGA LABAAD

MASAWIRKA CADEEYAHA

CANAB CALI XUSEEN



MASAWIRADDA MARKHAATIYAASHA


1-AXMED CABDI AXMED "barayare"



2-SAKARIYE MAXAMED NUUR



SAXIIXA CADEEYAHA
Canab Cali Xuseen

CANAB 

=SAXIIXA MARKHAATIYAASHA=

1-Axmed Cabdi Axmed "Baryare"

2-Sakariye Maxamed Nuur




Rep. 1128/TPN/2024

(CADDEYNTA NOOTAAYAHA)

Anigoo ah Nootaayaha Tayo, Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo", waxaan caddeynayaa in saxiixyada sare yihiin kuwii runta ahaa 1- Canab Cali Xuseen, Somali ah Hooyadeedna layiraahdo Qaali Xuseen Guraadse Ku Dhalatay B/wayne 1973 Lehna Somali Pass.l.r.P01539685, "Ahna Cadeeye" iyo waliba Labada Nin ee Soomaaliyeed oo dhanka maragga ka caawiyey oo kor ku xusan, dadkaan oo anigu aqoonsadey hubiyeyna in magacyadaas ay leeyihiin waxay heshiis kaan igula saxiixeen Xafiiska iyaga oo xis qaba raalina ah, Caafimaad qaba, Xiskooduna taam yahay, Cid khasbeysana aysan jirin, Waana Cadeyn Qaadasho Qayb Dhaxlayd oo ansax ah oo Waafaqsan Shareecada Islaamka.

NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"





FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA


Tr. 10/11/2024

Aniga oo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Sakariye Maxamed Nuur** oo ka Wakiil ah Loo Caddeeye **Jamaad** Dukumiintiga **Original** Caddeynta **Rep No. 1128/T.P.N/24, Tr. 24/08/2024**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca Loo Caddeeyaha	Jamaad
Taariikhda Caddeynta	24/08/2024

Wakiilka Loo Caddeeye: Aniga oo ah **Sakariye Maxamed Nuur**, Degan **MUQDISHO**, **Telephone No**

Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaaday Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Caddeynta faah faahinteedu Sare ku cadahay uuna leeyahay **Jamaad**.



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Dr. Maxamed C/laahi Maxamed

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

Sakariye Maxamed Nuur